# Barnaamijka Caafimaadka Ilkaha ee 802 Smiles
# Oggolaanshaha Adeegyada (Qaybta 3 aad)

**Fadlan buuxi macluumaadka hoose, saxiix oo kusoo celi dugsiga cunugaaga.**

**Magaca koowaad iyo kan saddexaad ee Cunugaaga: ________________________ Taariikhda Dhalashada: ___________**

## Waa maxay daaweynada lagu bixiyo Barnaamijka Caafimaadka Ilkaha ee 802 Smiles?

Barnaamijka Caafimaadka Ilkaha ee 802 Smiles ee dugsigaaga wuxuu bixiyaa baaritaanada ilkaha, nadiifinta, ku dhaqista fluoride, maadada fluoride ee ilkaha lagu nadiifiyo (silver diamine fluoride, SDF) (oo ku qoran Ingiriis),. **Si aad u hesho SDF, waa inaad buuxiso foom oggolaansho oo dheeraad ah; akhri xog badan oo ku saabsan daaweynta SDF ee ku qoran foomka.**

Waxaan ku talinaynaa in cunugaagu helo daryeel iyadoo loo maraayo goobta caafimaadka guriga ee la dejiyay, haddii aad ilmo haysato, halkii uu ka mari lahaa Barnaamijka 802 Smiles ee Caafimaadka Ilkaha ee dugsigaaga.

## Oggolaanshaha Daaweynta:

☐ Haa, **Waxaan doonayaa in cunugaygu ka qaybgalo Barnaamijka Caafimaadka Ilkaha ee 802 Smiles.** Waxaan fahamsanahay haddii uu jiro dhakhtar ilko oo lagu xusay foomkan, inuu warbixino ka heli doono dhakhtarka nadaafada ilkaha ee 802 Smiles. Waxaan fahamsanahay in cunugaygu heli karo qayb ama dhammaan adeegyada soo socda iyadoo lagu saleynaayo qiimeynta dhakhtarka nadaafada ilkaha ee 802 Smiles, iyadoon lala tashan dhakhtarka ilkaha:

- baaritaanka ilkaha
- nadiifinta ilkaha haddii
- ilko ku dhaqista fluoride
- maadada fluoride ee ilkaha lagu nadiifiyo (silver diamine fluoride)

☐ **Maya, Ma doonaayo in cunugaygu ka qaybgalo Barnaamijka Caafimaadka Ilkaha ee 802 Smiles.**

## Oggolaanshaha Macluumaadka Lagula Wadaagaayo:

Dhakhtarka ilkaha ee cunugaaga: Haddii uu jiro dhakhtar ilko oo ku qoran foomka cunugaaga oo aad doorato inuu daryeelka ka helo Barnaamijka 802 Smiles, Macluumaadka ku saabsan adeegyada la bixiyay waxaa lala wadaagi doonaa dhakhtarkaas. **Wadaagista macluumaadkaan waa qasab:**

☐ Haa, **Waxaan doonayaa in macluumaadka cunugayga lala wadaago dhakhtarkiisa ilkaha ee ku xusan faylka.**

☐ Maya, **Ma doonaayo in macluumaadka cunugayga lala wadaago dhakhtarkiisa ilkaha ee ku xusan. Waxaan fahamsanahay in cunugaygu uusan daryeelka ilkaha ka heli doonin Barnaamijka Caafimaadka Ilkaha ee 802 Smiles.**

Waaxda Caafimaadka ee Vermont: Waaxda Caafimaadka ee Vermont waxay jeclaan lahayd inay isticmaasho macluumaadka cunugaaga si ay u qiimeyso waxtarnimada barnaamijkan. Sidoo kale oggolaansho ma siisay dhakhtarka nadaafada ilkaha ee 802 Smiles si uu diiwaanada daaweynta ilkaha ee cunugaaga ula wadaago Waaxda Caafimaadka ee Vermont? **Macluumaadka la wadaagidan waa ikhtiyaari:**

☐ **Haa, Waxaan oggolahay in** dhakhtarka nadaafada ilkaha ee 802 Smiles diiwaanada ilkaha **ee cunugayga uu la wadaago** Waaxda Caafimaadka ee Vermont.

☐ **Maya, Ma oggoli in** dhakhtarka nadaafada ilkaha ee 802 Smiles diiwaanada ilkaha **ee cunugayga uu la wadaago** Waaxda Caafimaadka ee Vermont.

Fadlan calaamadee halkaan haddii aad tahay **waalidka ilmaha soo korsaday**, ama haddii aad wax **ka bixiso masruufka ilmahan**: ☐

Saxiixa Waalidka/Masuulka: __________________________________________ Taariikhda: __________________________

Magaca Waalidka/Masuulka oo Far waawayn ku qoran: __________________________________________

**Haddii aad cunugaaga u oggolaato inuu ka qaybgalo Barnaamijka Caafimaadka Ilkaha ee 802 Smiles, fadlan usii gudub bogga xigga.**

# Barnaamijka Caafimaadka Ilkaha ee 802 Smiles
# Oggolaanshaha Adeegyada (Qaybta 3 aad)

## Taariikhda Caafimaadka ilkaha ee cunugaaga:

Goorma ayay ahayd markii ugu dambeysay ee cunugaagu booqday dhakhtar ilko?

○ Inta lagu jiray sanadkii lasoo dhaafay dhakhtar ilko oo lagu xusay foomkan, ○ Wax ka badan Hal Sano ○ Marna ma uusan booqan

Yaa waaye dhakhtarka ilkaha ee koowaad ee cunugaaga haddii uu leeyahay mid? ________________________________

Waa maxay nooca caymiska ilkaha ee cunugaagu haysto? Majiro ilmo loo diidi doono adeeg sababo la xariira inuusan haysan caymis daboola kharashkiisa. Oggoow in dhakhtarka nadaafada ilkaha ee 802 Smiles laga yaabo inuu kharashka ku dalaco Medicaid si ay u bixiyaan kharashka adeegyada cunugaagu helay.

○ Medicaid/Dr. Dynasaur – Lambarka Aqoonsiga Medicaid ee cunugaaga: ___________________
○ Caymiska ilkaha ee gaarka loo leeyahay (tusaale, Caymiska ilkaha ee Delta)
○ Tricare
○ Ma haysto wax caymis ah
○ Wax kale ___________________
○ Ma aqaan
Waxaan doorbidaa inaanan

Cunugaagu ma qabaa wax xasaasiyad ah? (tusaale, xasaasiyada laga qaado daawooyinka, cuntada, latex, qalinka, iwm.) ○ Haa ○ Maxay

Haddii jawaabtu haa tahay, sheeg nooca? ____________________________________________________________________

## Taariikhda caafimaadka ee cunugaaga:

Cunugaagu ma leeyahay xaalad caafimaad daro jireed, dhimir, waxbarasho, ama xaalad caafimaadka oo la xariirta shucuurta ama naafonimada?

○ Haa ○ Maya ○ Ma aqaan ○ Waxaan doorbidaa inaanan ka jawaabin

Haddii aad ku jawaabtay haa su'aasha hore, sidee qaab fiican ugu diyaarin kartaa cunugaaga inta lagu jiro booqashada ilkaha?__________________________________________________________________________________________

## Macluumaadka Ilmaha ee ikhtiyaarka ah:

**Jinsiga loo aqoonsaday inuu yahay markii uu dhashay:** ○ Lab ○ Dhedig ○ Labeebshe ○ Waxaan doorbidaa inaanan ka jawaabin

Su'aasha xigta waxay ku waydiineysaa jinsiyada iyo qowmiyada cunugaaga: Waxaan dadka weydiinaynaa su'aashan si aan u hubino in barnaamijkeenu u adeegaayo dhammaan dadka jinsiyadaha iyo qowmiyadaha kaladuwan. Waxaan fahamsanahay in doorashada jawaabaha ay noqon karaan kuwo si sax aan oga turjumeyn cunugaaga.

**Kuwaan soo socda keebaa sida ugu fiican u qeexaya cunugaaga? (Calaamadee dhammaan kuwa khuseeya.)**

○ Abenaki ama dhalasho kale oo Maraykan ah ama heysta aqoonsiga Dhaladka Alaska

○ Aasiyaan ama Aasiyaan Ameerikaan, tusaale ahaan, Shiinees, Aasiyaan Hindi, Nebaaliis, ama Taageerno

○ Madow Afrikaan Ameerikaan

- ○ Hispanic ama Latino, Latina, ama Latinx, tusaale ahaan, meksikaan, Venezuelan, ama Brazilian
- ○ Kasoo jeeda Bariga dhexe ama Waqooyiga Afrika (liiska wuxuu kasii socdaa bogga xigga)
- ○ Dhalad Hawaii ah ama Jasiiradaha Baasifigga kasoo jeeda
- ○ Caddaan ama Ameerikaanka Yurub kasoo jeeda
- ○ Jinsiyad ama qowmiyad dheeraad ah, fadlan la wadaag: ______________________________
- ○ Waxaan doorbidaa inaanan ka jawaabin

Majiraan wax kale oo aad jeclaan lahayd inaan ka oggaano cunugaaga?

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

**Foomka oo aad buuxisay oodna soo saxiixday kusoo celi dugsiga cunugaaga.**